MILWAUKEE PUBLIC SCHOOLS

Foomka Oggolaansho Bixinta Daawaynta ee Hab-maamuuska MPS

Magaca Ardayga: _____ Aqoonsiga #: _____ Taariikhda Dhalashada: _____

Dugsiga: _____ Fasalka: _____

Waalidka/Mas'uulka Qaaliga ah:
Kalkaaliyaasha Dugsiga iyo Kaaliyeyaasha Kalkaalisada Dugsiga waxay daryeel siiyaan ardayda joogta Degmada Dugsiga Dadweynaha ee Milwaukee. Adeegyadani waxay taageeraan badbaadada, badqabka, iyo dugsi ka xaadiritaanka ilmahaaga inta lagu jiro maalinta dugsiga.

Kalkaaliyayaasha ayaa laga yaabaa inay Acetaminophen (Tylenol®) ama Ibuprofen (Advil® ama Motrin IB®) siiyaan ardayda si looga daaweeyo madax-xanuunka marmarka ah, xanuunka murqaha, caabuqa seedaha, caabuqyada la xiriira dhaawaca, xanuunka caadada, ama qandho gaaraysa 100.4°F ama wax ka badan. **Fadlan ogow in iyadoo ilmo ay saaran tahay qandho laga yaabo in la siiyo Tylenol intuu joogo dugsiga, sidoo kale waa in laga soo kaxeeyo dugsiga oo ay joogaan guriga ilaa ay qandho la'aan ka noqdaan 24 saacadood iyada oo aan la isticmaalin dawooyinka qandhada yareeya.**

Ardayda ay ka muuqato astaamaha u eg kuwa cudurka neefta waxaa laga yaabaa in kalkaalisada ay siiso daawada la neefsado ee Albuterol ama Proventil®, haddii laga heli karo xafiiska caafimaadka. **Borotokoolka bixinta aalada neefsashada ee Albuterol waxa loogu talagalay in loo isticmaalo xaaladaha degdegga ah oo keliya, bedelna uma ahan in ilmahaaga uu aalada neefta uu usoo qaato dugsiga. Haddii ilmahaaga uu guriga ku isticmaalo aalada neefshada ee samatabbixin ama albuterol, fadlan dugsiga sii daawada, dalabka caafimaadka, iyo oggolaansho bixinta waalidka/masuulka oo saxeexan. Aalada neefsashada ee borotokoolka Albuterol looma diri doono safarada dibadda.**

Waa muhiim in la ogaado in ilmahaaga uu heli karo daawooyinkan keliya marka la helo ogolaanshahaaga oo saxeexan, bixinta daawada waxa ay ku xiran tahay helitaanka/joogitaanka Kalkaaliyaha. Oggolaansho bixintaada waxay xaqiijinaysaa inaad si firfircoon ugu lug leedahay **maareynta daryeelka caafimaadka ilmahaaga iyo inaad ka warqabto wixii waxqabad caafimaad ah oo la sameeyo.**

Haddii aad jeclaan lahayd in ilmahaaga uu helo daawooyinka borotokoolka inta uu joogo dugsiga marka loo baahdo, fadlan buuxi foomkan oo ku celi kalkaalisada dugsiga joogta. Fadlan xasuusnoow in foomkan oggolaansho bixinta ay tahay in la buuxiyo sannad kasta si loo xaqiijiyo inaan helno macluumaadka ugu cusboonaysiisan ee ku saabsan baahiyaha caafimaadka ilmahaaga.

Qiyaasta dawooyinka waxa lagu qeexay "Dalabyada Joogtada ah" ee uu ansixiyay La-taliyaha Caafimaadka ee Degmadda. **Fadlan calaamadeey daawada aad jeclaan lahayd in ilmahaaga uu helo.** Jadwalka qiyaas/doos bixinta waa sidan hoose:

☐ loogu talagalay QANDHADA, MADAX-XANUUNKA ama XANUUNKA JIRKA, **Kalkaaliyaasha** ayaa laga yaabaa inay bixiyaan:
Acetaminophen (Tylenol®) oo ku salaysan tilmaamaha miisaanka oo qiyaas ahaan ah 15 mg/kg/kuuradiiba 4-6 saacadood kasta hadba marka loo baahdo hal kuuro oo ah 650 mg.
AMA
Ibuprofen (Advil® ama Motrin IB®) oo ku salaysan tilmaamaha miisaanka oo qiyaas ahaan ah 10 mg/kg/kuuradiiba 8 saacadood kasta hadba marka loo baahdo ugu badnaan hal kuuro oo ah 400 mg.

☐ loogu talagalay XANUUNKA JIRKA ama XANUUNKA CAADADA, **Kalkaaliyaasha** ayaa laga yaabaa inay bixiyaan
Ibuprofen (Advil® ama Motrin IB®) oo ku salaysan tilmaamaha miisaanka oo qiyaas ahaan ah 10 mg/kg/kuuradiiba 8 saacadood kasta hadba marka loo baahdo ugu badnaan hal kuuro oo ah 400 mg.

☐ loogu talagalay ASTAAMAHA U EG KUWA CUDURKA NEEFTA, **Kalkaaliyaasha** ayaa laga yaabaa inay bixiyaan:
4-6 buufis oo aalada neefsashada ee **Albuterol** ee kuuradeedu cabiran tahay. Waxaa lagula soo xiriiri doonaa ka dib marka daawada la siiyo. Waxa laga yaabaa in lagu celiyo 20 daqiiqo gudahood haddii astaamaha ay sii socdaan.

☐ **HA SIININ** ilmahayga mid ka mid ah daawooyinka borotokoolka ee kor ku xusan.

Waxaan daaweyn karnaa ilmahaaga kaliya markaan helno ogolaanshahaaga qoraalka ah. Waa in aan ogaano haddii ilmahaaga uu qabo **wax xasaasiyad daawo ah** ama taariikh falcelineed oo ka dhan ah daawo. **Fadlan liis gareey:**

_____

Waxaan u fasaxay Kalkaalisada inay ilmahayga siiso kuurooyin marmar ah oo ah daawooyinka lagu daweeyo qando, madax-xanuun, xanuunka jirka, xanuunka caadada ama ciriiriga neefsiga/naqas ku dhegida.

Saxeexa Waalidka/Masuulka Sharciga ah	Lambarka Taleefanka	Taariikhda: (Bisha/Maalinta/Sannadl